



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## PD Newsletter



### Soo dhawow, 2021!

Waa wargayska sadexdii biloodlaha ah ee Washington State Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxaana loogu talo geley in bushqada Washington ee waxbarashada hore uu la socodsiiyo si joogto ah dhamaan qaybaha shaqooyinka wanaagsan si ay u sameeyaan [Hormar Xirfadeed](#).



### Fariimahan...

- [Agabka bixiyaha waxbarashada hore ee COVID-19](#)
- [Khayraadka Beddelka ah ayaa halkan kuu yaala!](#)
- [Tilmaanta Agoonsiga La socda](#)
- [Wax Ka Baddalka Tabobarka](#)
- [Taxanaha siminaarka guga](#)
- [Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada](#)
- [Deeqaha Waxbarashada Early Achievers, Sheeqooyinka Guulaha](#)

- [Fursadaha ka jira barnaamijka ECE ee North Seattle College](#)
- [Cusboonaysiinta weebaytka](#)
- [Cusboonaysiinta qabiil](#)
- [Caalamadayso boga intarneetka ee horumarinta xirfadeed](#)
- [Rukumo Fariimaha PD](#)
- [Fariin ka socota Xogyahaha DCYF](#)
- [Wararka COVID-19](#)
- [Sidee Ayaynu Nahay?](#)

## Agabka bixiyaha waxbarashada hore ee COVID-19

DCYF waxay isticmaaleysaa [Sharciga CARES \(Caawimaadka Coronavirus, Raysashada, iyo Amaanka Dhagaalaha\)](#) maalgalinta iibsashada agabyada si loo sameeyo agabyada hawlaha ee bixiyayaasha waxbarashadda hore ee ruqsada haysta ee ku baahsan Washington.

Agabyadan waxaa ku jiri doona waxyaabo ay bixiyayaashu isticmaali karaan si ay uga caawiyaan hirgelinta tilmaamaha COVID-19 ee bey'adooda daryeelka. Agabyada ayaa ka koobnaan doona waxyaabo kala duwan oo gacan ka geysanaya kor u qaadista kala fogaanshaha jirka, dhaqidda gacmaha, iyo taageerida caafimaadka shucuurta sida:

- Buugaagta carruurta ee ku saabsan COVID-19 iyo feejignaanta
- Cabirayaasha mitirka iyo dunta
- Calaamadeeyaasha barta wareega ah iyo sal ka dhuubnayaasha
- Qoraallo daabacan ee ka caawinaya macallimiinta inay taageeraan fulinta tilmaamaha COVID-19 ee carruurta iyo qoysaska



Agabyada ayaa la saadaalinayaa in la qaybiyo bisha Febraayo, xiriir badan ayaa soo bixi doona toddobaadyada soo socda.

## Khayraadka Bedelka ayaa halkan kuu yaala!

Waxbarashada iyo Daryeelka Hore ee Washington [khayraadka Bedelka](#) ayaa la heli karaa inay ku taageerto xarumaha rukhsada haysta waqtiga la sii daayo ee uu bixiyo gobolku. Helitaanku wuxuu kuxiranyahay helitaanka maalgelinta.

### Billow

- Dib u eeg [shuruudaha u qalmitaanka](#) nooca barnaamijkaaga
- Daawo [kala barashada xarunta](#)
- [Raadi qof baddel ah](#)



## Shaqaalaysiinta qof baddel ah

Bixiyeyaasha ruqsadda haysta waxay ka dooran karaan liistada beddelka aqoonta u leh aaggooda ama ay la shaqeyn karaan qof ay garanayaan inuu noqonayo beddel aqoon leh. Haddii adeeg bixiyuhu doorbido inuu la shaqeeyo qof ay garanayaan oo aan wali bedel ahayn, u gudbi qofkaas Machadka The Imagine si uu u barto [sida loo noqdo beddel la oggolaaday](#) Dhammaan kuwa beddelka u qalma ayaa buuxiya heerarka hadda jira ee macallinka hoggaaminaya barnaamijka ruqsada haysta.

Haddii aad su'aalo ka qabtid khayraadka beddelka ama aad rabto inaad wax badan ka barato, fadlan iimeel u dir [Machadka Imagine](#) ama wac 206-492-5249.

### Tixraacyo dhakhso ah:

- [Raadi qof baddel ah](#)
- [Noqo qof baddel ah](#)
- [Codso qof baddel ah](#)
- [Kala-barashada xarunta](#)
- [Buuga baddelaada](#)

---

## Tilmaanta Aqoonsiga La socda

Khayraadkan cusub wuxuu sharraxayaa aqoonsiyada kale ee ay ku qorantahay kuleejka/dhibcaha. Tan waxaa ka mid ah shahaadooyinka la xiriira ECE, dhibcaha kulleejyada la iswaafajiyay, iyo shahaadooyinka iyo aqoonsiyada DCYF ee la aqoonsan yahay.



Haddii aad qabtid wax su'aalo ah oo ku saabsan waxbarashadii aad horey u haysatay ama aad ku shaqeyneyso, la xiriir [Kooxdeena taageerada MERIT](#).

Waxaad eegtaa!

[Tilmaanta Aqoonsiyada Baddelka ah](#)

---

## Wax Ka Baddalka Tabobarka

### Daryeelka Ilmaha ee Aas Aasiga ah Waxaa Lagu Heleyaa Online ahaan!

Aasaaska Daryeelka Carruurta ee dhanka intarneeetka ah (CCB) ayaa hadda laga heli karaa [goobta tababarka DCYF](#)! CCB-da dhanka intarneeetka ah waxaa lagu siinayaa lacag la'aan bixiyeyaasha. DCYF waxa ay wakhti xaadirkan la shaqaynaysaa cida gacansaarka lala leeyahay tobobarka si loo bixiyo CCB tooska ah ee onlineka ah.



[Ikhtiyaaro dheeraad ah](#) oo loogu talagalay dhammaystirka tababarka CCB, oo ay ku jiraan beddelaadaha ku-meel-gaarka ah ee uu sababay COVID-19, wali waa la heli karaa.

Si aad u hesho tababbarro CCB oo dheeri ah, isticmaal barta "[Raadi Tababar](#)" ee ku jirta diiwaanka shaqaalaha, [MERIT](#).

## Macluumaadka ugu danbeeya ee Kordhinta Tayada Waxbarashada Hore (Enhancing Quality Early Learning, EQEL)



Waa maxay EQEL?

- Kordhinta Tayada Waxbarashada Hore ee EQEL, waxaa weeye tobobar 20 saacadood ah oo lagu dhamaysan karo laba sano. Sanadka 1 ee tobobarku waxa uu ka kooban yahay 10 saacadood ee ugu horeeya ee EQEL, waxaana kamid ah mawduucyada: Nidaamka Jawaabta Dhaqanka, Dhismaha Maskaxda, Shaqada Guud iyo Jawaabta Daryeel Bixiyaha.

Sideen u heli karaa tobobarkan?

- Bixiyayaashu waxay isticmaali karaan daaqada "[Find Training \(Hel Tobobar\)](#)" ee MERIT. Tobobarkan waxaa bixiyaha deegaamada Ogaanshaha Daryeelka Ilmaha ee Washington (Child Care Aware of Washington) iyo Hay'ada Imagine (Imagine Institute).
- Helitaanka Tasmada 'Sanadka 1' ee gobolka oo dhan wuxuu noqon doonaa Febraayo 2021.

#### Sidee ayaan u geli karaa tobobarkan?

- EQEL waxaa lagu bixin doonaa macalin toos ah oo ku bixin doona madal online ah oo maqal iyo muuqaal ah. Bixiyayaashu waxay isticmaali karaan daaqada "[Find Training \(Hel Tobobar\)](#)" ee MERIT si ay u helaan ikhtiyaarkan.
- Tababarka shaqsi ahaaneed ayaa la heli doonaa iyada oo lagu salaynayo tilmaamaha caafimaad ee ay bixiyaan maamulada caafimaadka deegaanka, Waaxda Caafimaadka ee Gobolka Washington, iyo Xafiiska Guddoomiyaha.
- Nooca dhanka intarneetka ah ee 'Sannadka 1' EQEL waxaa laga heli doonaa [barta tababarka DCYF](#) guga 2021.

#### Yaa dhamaystay tobobarkan?

- Bixiyayaasha waxbarashadda hore ee la shaqaaleeyay wixii ka dambeeya Agoosto 1, 2019, oo ka shaqaynaya doorka caawiyaha macallinka, macallinka hoggaanka ah, rukhsadda haystaha guriga qoyska, kormeeraha barnaamijka, iyo agaasimaha xarunta ayaa u baahan doona inay dhammaystiraan tababarkan.
-

## Waxyaabaha kasoo cusboonaaday Goobta Tababarka ee DCYF

Washington State Department of  
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

**TRAINING CATALOG**

Search...

**Program**

Admin  ECEAP

**Role**

FFN  ECEAP  ESIT

**Language**

English  Spanish  Somali

Electronic Attendance Training 35 min

Safe Sleep 40 min

Medication Management 1 hr 10 min

Electronic Attendance Training 45 min

Immunization in Child Care 20 min

**Training**

Safe Sleep

**Health & Safety Trainings**

Mandated Reporter

**Annual Renewal**

**Family, Friend & Neighbor Training**

Safe Sleep	Completed	Expires
	07/10/20	07/10/21

**Completed**

**Child Care Basics**

	Started	Completed
Introduction to CCB	7/1/20	7/11/20
Professional Practice	7/1/20	7/11/20
Valuing Each Child & Family	7/1/20	7/11/20
Child Growth and Development	7/1/20	7/11/20
Celebrating Child Growth	7/1/20	7/11/20
Learning & Environments	7/1/20	7/11/20
Family & Community Partnerships	7/1/20	7/11/20
Safe and Healthy Practices Part 1	7/1/20	7/11/20

Goor dhow soo socda. Goobta [tababarka DCYF](#) waa la cusbooneysiinayaa. Waxaad isticmaali kartaa liiska tababarka si aad u raadiso tababarro ku saleysan nooca barnaamijkaaga, dooraaga ama luuqada aad doorbideyso. Waxaad sidoo kale awood u leedahay inaad la socoto tababbarkaaga iyadoo lagu salaynayo xaaladaha soo socda:

- Hawshu way socotaa
- Taariikhaha dib u cusboonaysiinta Sanadlaha ah
- Dhameeyay

Tilmaamaha la cusbooneysiiyay ayaa lagu daray [bogga intarneeetka MERIT](#) hoosta "Tababar" iyo "Barta Tababarka Ardayda DCYF." Haddii aad u baahan tahay taageero dheeri ah, la xiriir [Kooxdayada Taageerada MERIT](#).

Miyaad seegtay siminaarka Janaayo ee ku saabsanaa cusbooneysiinta Barta Tababarka DCYF?

Hada daawo si aad u aragto sida cusbooneysiintani ay kuu caawin doonto marka xigta ee aad tababarka ku dhameystirto goobta tababarka DCYF.

[daawo webinar](#)

## Qaabka Tobobarka Bulshada Ku Salaysan

Qaabka Tababarka ku saleysan Bulshada wuxuu bixin doonaa wadiiqo tababar si looga caawiyo buuxinta u qalmitaanka shaqaalaha srukhsada bixinaya kuwa looga baahan yahay inay haystaan shahaado hore ama gaaban.

Tijaabada ayaa la heli doonaa xagaaga 2021.

Ma Doonaysaa Inaad Wax Badan Ogaato?

- **Akhri:** [Cusboonaysiinta oo buuxda](#)
- **La Soco:** Macluumaadka ugu danbeeya ee xaalada waxaa la soo gelin doonaa [websaytkaayaga](#) iyo sadexdii biloodna [Wargeyska Hormarka Xirfadaha](#)
- **Wadaag:** Hadii aad qabto wax su'aalo ah ama faalooyin, la xidhiidh [Diana Stokes](#)



Fadlan la soco in ikhtiyaarkan hada la samaynayo oo uu hagayo [Sharciqa Aqalka \(HB\) 2556](#), iyo hirgalinta gobolka oo dhan qaabkani wuxuu kaloo kuxiranyahay maalgalinta cusub.

## Taxanaha siminaarka guga



Taxanaha siminaarka guga wuxuu diiradda saari doonaa mawduucyo kala duwan oo ku saabsan tababarka, aqoonta shaqaalaha, iyo barnaamijka Tababaraha Gobolku Ansixiyay.

Macluumaad buuxa iyo faahfaahinta diiwaangelinta ayaad ka helaysaa.

## Febraayo: Heerarka Tababaraha Dib loo eegay

Heerarka Tababarka Gobolku Ansixiyay (SAT) wuxuu u oggolaanayaa DCYF inay hubiso in dhammaan tababarayaasheena gobolka uu ansixiyay inay si joogto ah u bixiyaan khibrado waxbarasho oo tayo sare leh oo loogu talagalay xirfadleyda carruurnimada hore iyo da'da iskuulka.



Kooxda Shaqaalaha ee Heerarka Tababaraha ayaa soo bandhigay qabyo qoraalka heerarka tababaraha ee dib loo eegay. Siminaarkan wuxuu ka hadli doonaa:

- Isbedelada lagu sameeyay fikirka, oo ay ku jiraan ku darida aqoonta barashada aan tooska ahayn.
- Samaynta fikrada ka dhanka ah eexda iyo midab takoorka.
- Adeegsiga isku dheelitirnaanta si loo muujiyo horumarka aqoonta iyo xirfadaha.

Fadlan nagu soo biir si aan wax uga ogaano halka ay kheyraadkani u socdaan iyo sida loogu adeegsan doono nidaamka. Waxaan xiiseyneynaa inaan maqalno su'aalahaaga iyo jawaab celintaada dukumintiga.

**Talaado, Maarso 16 | 6 p.m.**

[Halkan Iska Diiwaangelin](#)

*Dhegeystayaasha siminaarkan waa: Kordhinta Rukuntayaasha Fariimaha Shaqaalaha (tababarayaal, carbiyaal, Xirfadlayaal Xiriir ku saleysan, kuwa doorka taageerada).*

## Maarso: Aqoonta Shaqaalaha - Cusbooneysiinta Waxbarashada

Inta lagu jiro siminaarkan, kooxda PD waxay la wadaagi doonaan wax badan oo ku saabsan waddooyinka waxbarashada, oo ay ku jiraan:

- Sida loo muujiyo dariiqa aad dooratay ee Diiwaanka Shaqaalaha, [MERIT](#).
- Baro tallaabooyinka xiga ee dariiqa aad dooratay, oo ay ku jiraan ikhtiyaarka khibrada.
- Go'aami tallaabooyinka aad u baahan tahay inaad qaaddo iyadoo la tixgelinayo mudada doorkaaga.



**Talaado, Maarso 16 | 6 p.m.**

[Halkan Iska Diiwaangelin](#)



*Dhegeystayaasha siminaarkan waa: bixiyeyaasha waxbarashada hore iyo kuwa taageera xirfadleyda waxbarashada hore.*

---

## Ma seegtay siminaaradii Janaayo?

Waxaan bixinay dhowr Janaayo:

- Barnaamijka Tababarka ee Gobolku Ansixiyay: Miyaynu u soconaa jihada saxda ah?
- [Cusboonaysiinta DCYFtraining.com](https://www.dcyftraining.com)
- Kooxda Diirada Saarayisa Tababarka ku Salaysan Bulshada



Siminaarada marwalba waa la duubaa oo waxay toos uga socdaan boggeena [Fariimaha iyo Siminaarada](#).

*Haddii aadan heli karin siminaarka aad raadineyso, waxay u badan tahay inaan ka shaqeyneyno inaan duubno oo aan soo gelino. Waxaan kaaga mahad celinaynaa dulqaadkaaga Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan siminaar gaar ah, iimeel u dir [Marlene White](#).*

---

## Taageerada Shaqaalaha ECE ee Waxbarashada



DCYF way garanaysaa qiimaha waxbarashada iyo shaqooyinka loo igmanayo cida lala shaqeeyo ee bulshada waxbarashada sare si loo qaabeeyo oo loo buuxiyo barnaamijyo waxbarasho oo kala duwan si loogu taageero shaqaalaha waxbarashada hore.

Si loola socdo barnaamijyadan iyo waxbarashada kale ilaha, booqo [Bogga DCYF ee Waxbarashada iyo Deeqaha waxbarashada](#).

---

## Deeqaha Waxbarashada Early Achievers, Sheeqooyinka Guulaha

### Katie Johnson

*Waxaan dib ugu laabanaayay iskuulka deeqda Early Achievers sanadkii la soo dhaafay. Dayrtii hore waxay ahayd afartii bil ee u horaysay ee aan iskuulka ku noqday. Aad ayaan ugu faraxsanay inaan ku soo laabto iskuulka.*

*Waxaan rukhsad haystay toddobo sano ah muddadanna waxaan waday daryeelka carruurta ee guriga. Waxaan ka mid ahaa Barnaamijka Early Achievers illaa lix ka mid ah sannadahaas. Waxaan dareemayaa in aqoontii aan ka helay dib ugu soo laabashada machadka ay ahayd mid aad ii anfaday oo aan maalin walba aniga adeegsado! Waxaan dareemayaa inaan noqonayo macallin u fiican dhammaan carruurta aan sharaf ku leeyahay xanaaneynta.*



*Maaddaama gobolku uu ku dadaalayo sidii uu daryeel tayo sare leh ugu heli lahaa carruurta Washington, mid ka mid ah hababka ugu wanaagsan ee ay tan ku sameyn karaan ayaa ah inay sii wadaan deeqdan. Ma awoodi doono inaan iskood u sii wado machadka aniga oo aan caawimaad deeq helin. Waxay culeys dhaqaale ku keeni doontaa aniga iyo qoyskeyga haddii aan ku bixiyo fasaladayda si aan u buuxiyo shuruudaha waxbarasho si aan ganacsigeygu u furnaado.*

**- Katie Johnson, Olympic College Ka Faa'iidaytayaasha Deeqda Ardayga iyo Early Achievers**

---

### Sandra McMurrin

*Waad salaamantahay qof walba! Aad ayaan uga mahadcelinayaa Deeqda Early Achievers. La'aanteed, ma awoodi kari lahayn inaan awoodo waxbarasho si aan xirfadeyda u sii wato. Waxaan jeclahay inaan shaqeyn karo isla markaana aadi karo dugsi isla waqtigaasna aan ku dhaqmi karo waxa aan barto. Waxaan rabaa in aan noqdo macalin hogaamiya ah, laakiin ma sameyn karo taas dartiis waxaan u baahanahay shahaado mana awoodi doono in aan iska bixiyo fasalada aan ku jiro deeqda la'aanteed.*

*Waxaan ka weyn nahay dakhliga kaalmada dhaqaale, laakiin waxaan haysannaa afar carruur ah oo baahi badan qaba. Kaaliye macallin ahaan ma helo lacag aad u badan oo waxa i soo gala oo dhan waxay ku baxaan waxbarashadayda taas oo dhibaato ku noqon doonta qoyskeenna.*

*Deeqdani waxay ii oggolaaneysaa inaan naftayda wax ku baro si aan u wanaajiyo bulshadeedna oo aan aasaas adag siiyo carruurta ka tirsan bulshadeedna kuwa aadka ugu baahan. Waan ku faraxsanahay deeqdan iyo taageerada ay siisay aniga keliya aan ahayn lakiin carruurta fasalka ku jirta iyo qoyskeyga. Mahadsanid.*

**-Sandra McMurrin, Olympic College Ka Faa'iidaytayaasha Deeqda Ardayga iyo Early Achievers**



## Wadaag Sheekadaada!

Miyaad heshey lacag Early Achievers ah oo ma doonaysaa inaad wadaagto sheekadaada? Waxa aad sheekadaada u dirtaa Khabiirka Waxbarashadeena ECE, [Sharene Leek](#), si loogu daro wargeyska soo socda.



## Fursadaha ka jira barnaamijka ECE ee North Seattle College

Barnaamijka North Seattle College's Early Childhood Education (ECE) wuxuu daryeeleyaasha u diyaariyaa inay noqdaan tayo sare, aqoon sare, iyo macallimiin daryeel leh iyo u doodayaasha carruurta. Jidka North Seattle ee ECE waxaa ka mid ah:

- Shahaado macruuf oo heer gobol ah (Hore, Gaaban, iyo Gobol)
- Oo la xariir shahaadada heerka koobaad ee jaamacadeed Applied Sciences (AAS) degree
- Bachelor of Applied Science (BAS)

### Baro faa'iidooyinka barnaamijku bixiyo:

- Loo diyaariyay arday shaqaynaya maalinta oo dhan: fasalada khadka tooska ah/Zoom ayaa la bixiyaa fiidkii iyo maalmaha dhamaadka usbuuca.
- La taliyayaal ayaa diyaar u ah inay ka caawiyaan qorshaynta kaalmada tacliinta iyo dhaqaalaha.
- Barnaamijka I-BEST sidoo kale waa la bixiyaa, kaas oo siiya taageero dheeri ah kuwa aan aqoonta badan u lahayn Ingiriisiga.
- Koorsooyinka Shahaadada Hore ee Gaaban waxaa lagu bixiyaa Isbaanish, Carabi, iyo Soomaali. Jiilaalka 2021, koox Oromo ah ayaa la bixin doonaa.
- Shahaadada ECE BAS waxaa lagu bixiyaa barnaamijyo isku dhafan iyo kuwa internetka oo buuxa. Si aad waxbadan uga ogaato barnaamijkan [iimayl u dir lataliye](#).



- *Waaqtigan xaadirka ah, dhammaan fasalada waa khadka tooska ah COVID-19 awgeed.*

macluumaad dheeraad ah, booqo [North Seattle College ECE Program](#) ama iimayl udir [North Seattle College ECE Info](#).



## Cusboonaysiinta websaytka



Waxaan ka shaqeyneynaa inaan si fiican u abaabulno uguna gudbino macluumaadka [Bogagga Horumarinta Xirfadlayaasha](#). Marka aan ku shaqeyno wargalinadan, waxaad arki kartaa isbeddel macluumaad.

**Waan soo dhaweyneynaa ra'yigaaga inta aan ka shaqeyneyno mashruucan!**

*Ma heleysaa waxaad raadineyso? Macluumaadka macquul miyaa? Miyaad isku aragtay hingo? Hadday sidaas ay tahay, halkee ku taal? Ma heli karaa wax cayiman? Nasoo ogaysii!*

Kusoo dir fikir celintaa [Marlene White](#).

## Cusboonaysiinta qabiil



Ma ogeyd in DCYF ay leedahay Xafiiska Xiriirka Qabiil ahaaneed?

- [Akhri fariimahooda u dambeeya](#)

DCYF waxay bixisaa rukumada mowduucyo kala duwan ah. [Hubi liiska buuxa ee mawduucyada rukumashada](#).

caLaamadayso boga intarneetka ee horumarinta xirfadeed



Ha moogaan wararka cusub ee la xiriira tababarka iyo Horumarinta Xirfadeed. Calaamadee bogga Websaytka Horumarinta Xirfadeed!

[Calaamadee Bogga Websaytka PD](#)

## Rukumo fariimaha PD

*Kordhinta Shaqaalaha* waa kheyraad loogu talagalay dhammaan shaqsiyaadka ku jira ganacsiga gaarsiinta taakuleyn waxbarasho xirfadeed shaqaalaha waxbarashada hore.

*Wargeysa PD* waxaa loogu telo geley in uu la socodsiiyo bulshada waxbarashada hore ee Washington dhamaan shaqooyinka Hormarka Xirfadlaha ah.



[Rukumo](#)

*Liiska fariimaha oo dhameystiran waxaa laga heli karaa boggeena [Fariimaha iyo boqqa Websayt](#).*

Fariin ka socota Xogyahaha DCYF



Xog Hayaha DCYF Ross Hunter waxay la wadaagi doontaa fariimaha bishii bixiyayaasha ee macluumaadka ugu danbeeya iyo wararka ku saabsan shaqada hay'ada. Waxaad akhridaa fariintiisa ugu danbaysa oo [waxaad riixdaa halkan si aad ula socoto](#).

- [Fariimaha Janaayo 2021](#)
- [Fariimaha Diseembar 2020](#)
- [Fariimaha Nofeembar 2020](#)


Hadii aad heyso wax suaalo ah ama faalooyin, fadlan la xidhiidh DCYF [Xafiiska Xidhiidhaha](#).

---

## Wararka COVID-19

DCYF waxay leedahay websayt loogu talagalay wararka COVID-19.

[Iska hubi](#)



---

## Sidee Ayaynu Nahay?



Fadlan nala soo socodsii sida aan sameyneyno samaynta degdeg ah [sahanka saddex-su'aal ah](#).

Hadii aad ka qabto su'aalo ama aad nala socodsiiinayo mawduuc waxa aad la xidhiidhaa [Marlene White](#).